



Deeqaha Kaalmada Cuntada ee Adkaysiga ee Waaxda Beeraha ee Gobolka Washington (Washington State Department of Agriculture, WSDA)

WAREEGA SHANAAD EE DEEQAHA ADKAYSIGA WAXAY FURMAYAAAN GUGA 2025

Kaalmada Cuntada (Food Assistance, FA) ee Washington State Department of Agriculture (WSDA) waxay filaysaa furitaanka wareega shanaad ee Deeqaha Adkaysiga Guga 2025.

Si loo caawiyo wax ka qabashada baahiyaha muhiimka ah ee hay'adaha gargaarka gaajada ee Washington oo dhan, WSDA FA waxay siisaa codsiyada Barnaamijka Deeqaha Adkaysiga (Resiliency Grants Program) ururada gargaarka gaajada ee u qalma, oo ay kamid yihiin kuwa aan hada ka qaybqaadanaynin barnaamijyada aasaasiga ah ee FA.

Barnaamijka Deeqaha Adkaysiga waxa maalgeliya Miisaaniyada Hawlgelinta ee Sanduuqa Guud ee Gobolka. Miisaaniyadda 2025-2027 ayaa go'aamin doonta heerka maalgelinta ugu dambeeya ee deeqdan waana in la helaa Abriil 2025.

Barnaamijkani wuxuu ku biirisaa Hindisaha Diirad Saaritaanka Cuntada (Focus on Food) ee joogtada ah ee WSDA, taas oo hiigsanaysa in la hubiyo helitaanka sahay si badqab leh iyo takhasuslayaasha cuntada si loo taageero dad caafimaadka oo kobaca dadweynaha Washington. Gudiga Deeqaha Adkaysiga iyo Hindisaha (Resiliency Grants and Initiatives Committee), koox latalin ahaaneed oo kala duwan, ayaa ka caawin doonta wargelinta habaynta barnaamijkan

Deeqdani waxay mudnaanta siin doontaa:

- *Bixinta helitaanka maalgalin dabacsan ee hay'adaha gargaarka gaajada, oo ay kamid yihiin qabaa'ilka iyo ururada qabaa'ilka dhaladka, si ay u taageeraan baahida ururka hadda iyo muhiimka ah.*
- *Ku taageerida ururada gargaarka gaajada hababka ay u go'aamiyaan inay ugu fiican yihiin bulshadooda.*
- *Taageerida helitaanka cuntada nafaqada leh, oo ay ku jirto bulshooyinka si fiican aan loogu adeegin.*
- *Xaqiijinta in maalgalinta laga qaybiyo gobolka oo dhan.*

Iyada oo loo marayo barnaamijkan, WSDA FA waxay maalgalin doontaa mashaariicda faa'iido degdeg ah u keenaya bulshada waxayna beegsan doontaa ujeedooyinka soo socda:

- Iskaashi la samaynta ururada si ay horumar la taaban karo ugu sameeyaan shabakada gargaarka gaajada ee ka jira deegaankooda.
- Kordhinta helitaanka macmiilka cuntada oo yareeyo caqabadaha macmiilka soo wajaha.
- Ka jawaabista baahida ururka iyo bulshada.

Hay'adan waa bixiye fursad loo siman yahay.

Mudada heshiiska: Luuliyo 1, 2025, ilaa Juun 30, 2026.

Yay tahay inuu codsado?

Ururadu waxay ugu horayn diirada saareen wax ka qabashada hubanti la'aanta cuntada iyo gargaarka gaajada taasoo ay ku jiri karto gobolka Washington ururada aan macaash doonka ahayn ee leh heerka cashuur dhaafka ee hada sida waafaqsan qaybta 501(c)(3) ee Xeerka Dakhliga Gudaha (Internal Revenue Code, IRC); ama shirkadaha dadweynaha, gudiyaada, maamulka; qabaa'ilka dhaladka ee dawlada dhexe aqoonsan tahay; ururada qabaa'ilka dhaladka ama qabaa'ilka dhaladka ah ee aan la aqoonsan ee qaybta 501(c)(3).

Diwaangalinta Xog-hayaha Gobalka (Secretary of State, SOS) ee hadda ayaa loo baahan yahay.

Tilmaamaha codsashada waxaa loo tarjumi doonaa Isbaanish. Haddii aad u baahan tahay hagitaanka codsiga oo lagu turjumay luuqad kale, fadlan la xiriir foodassistancegrants@agr.wa.gov.

Macluumaad dheeraad ah oo ay ku jiraan qeexitaanno iyo shuruudaha u qalmitaanka

[agr.wa.gov/services/food-access/hunger-relief-resources/
food-assistance-grants/resiliency-grants](https://agr.wa.gov/services/food-access/hunger-relief-resources/food-assistance-grants/resiliency-grants)

Hay'adan waa bixiye fursad loo siman yahay.